

## **Shuruudaha Xaq u Yeelashada**

Si aad ugu qalanto ka qaybqaadashada Xarunta Cuntada Sharci (Legal Food Hub), ka qaybgalayaashu waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

1. Waa inaad noqotaa qof ah Beeralay, Ganacsade Cunto, ama Hay'adda Beeraha/Cuntada, ee hoos ku qoran:
  - a. Beeralay: Shakhsi, koox shakhsiyaad ah, ama shirkad ku taal gobolka Maine, Massachusetts, Rhode Island, Connecticut, New Hampshire ama Vermont kaas oo inta badan soo saara wax ka soo baxa beeraha ee loogu talgalay in la iibiyo (ay ku jiraan beeralayda), oo ay ku jiraan shaqaalaha beeraha; AMA
  - b. Ganacsade Cunto: Shakhsi, koox shakhsiyaad ah, ama shirkad ku taal gobolka Maine, Massachusetts, Rhode Island, Connecticut, New Hampshire ama Vermont kaas oo ka shaqeeya, qaybiya, isku-dara, kaydiya, ama suuq geeya cuntada ama badeecadaha cuntada ee loogu talagalay isticmaalka aadanaha , iyo ilaha ugu yaraan hal shay ama walxo ee badeeco oo ka soo go' beeraha ku yaala gobollada New England;\* AMA
  - c. Beerta/Ururka Cunto: urur aan macaash doonka ahayn oo ka shaqeeya gobolka Maine, Massachusetts, Rhode Island, Connecticut, New Hampshire ama Vermont kaaso ujeeddiisa koowaad ay tahay inay taageerto beeralayda ama ganacsatada cuntada (tusaale ahaan, urur ganacsi oo taageera beeralayda ama xarun cunto oo aan macaash doon ahayn ), AMA koox bulsho ama urur ka shaqeeya gobolka Maine, Massachusetts, Rhode Island, Connecticut, New Hampshire ama Vermont oo hadafkooda koowaad yahay inay wax ka qabtaan arrimaha cadaaladda bulshada ee la xoroora nidaamka cuntada (tusaale ahaan, suuqa beeralayda, iskaashatooyinka cuntada bulshada, ama urur beer bulsho).

\* Fadlan la soco in baabuurta cuntada qaada iyo maqaayadaha bulukeetiga iyo dhagaxa inta badan ma buuxiyaan shuruudaha ka Ganacsadaha Cunnada ee ujeedooyinka barnaamijkan ilaa ay qaybka yihiin hawl-abuur leh hadaf ballaarinta oo caddaaladda bulshada ah.

2. Haddii aad soo codsanayso gargaar sharci sida beeralay ahaan ama Ganacsade Cunto,\* waa inaad buuxisaa shuruudaha soo socda ee dakhliga ku soo gala:
  - a. Beerta ama ganacsiga cuntadu waa inay yihiin mid soo gala dakhli sanadeed ugu yaraan \$5,000 sanad cashuureedka ka hor AMA bilaabay inuu shaqeeyo saddexdii sano ee la soo dhaafay; IYO
  - b. Beerta ama ganacsiga cuntada dakhliga sanadlaha ee saafiga ah waa in aanu dhaafsiisanayn in ka badan \$30,000.
    - Beeraalayda, si loo go'aamiyo dakhliga saafiga ah ee sanadlaha ah ee shirkadaada, eeg laynka 34 ee Jadwalka F ee foormka (Form 1040) cashuur celintaada.

- Tixraacyada shirkaddaha cuntada waxay kala yihiin kuwa soo socda sole proprietorships ama LLCs loo canshuuro sida, eeg sadarka 31 ee foormka canshuurta ee Schedule C (Form 1040); partnerships ama LLCs ee loo canshuuro sida, eeg sadarka 22 ee ku qoran Foormka 1065; C Corporations, eeg sadarka 30 ee Foormka 1120; S Corporations, eeg sadarka 21 ee Foormka 1120S; IYO
- c. Dakhliga sanadlaha aqalka qoyska ee beeralayda ama ganacsadaha cuntada waa in aanu dhaafin 400% Heerka Saboolnimada Federaalka. Xisaabtan waa in lagu daraa dakhliga aan la kasban, xitaa haddii dakhligu uu xaddidan yahay (tusaale ahaan, sanduuqa ammaan ee xaddidan (trust fund)). Si loo go'aamiyo dakhliga qoyskaaga ee sanadlaha, ka eeg sadarka 9 ee foormkaaga canshuur celinta dakhliga ee shakhsi ahaaneed (Form 1040). Sanadka 2023, Tilmaamaha Heerka Saboolnimada Federaalka ayaa halka laga heli karaa (eeg tirada qoyskaaga iyo ee kolomka "400% FPL"). Haddii ganacsigu yahay ganacsi la wada leeyahay, milkiilayaashu waa inay ka soo baxaan shuruudaha dakhligiisa haddii mid ka mid ah dakhliga qoyska ee wadajirka ah uu hoos uga yahay tirada (iyadoo la xisaabinayo tirada dadka ee wadarta guud, hadda la isku daray dakhliga qoyska), ama haddii qof kasta dakhligiisa qoysku hoos u dhaco. tirada shuruuda.

\* Shuruuda dakhliga saafiga ah iyo dakhliga aqalka qoyska ma khuseeyaan Ururada Beeraha/Cuntada.

Shuruudahan waxaa dib loo eegay 21ka bisha Maajo, 2015. Waxaa loogu talagalay inay helaan dadka Beeralayda iyo Ganacsatada Cuntada ee dakhligoodu hooseeyo, iyo beerahaas iyo ganacsiyada ka shaqeeya si yar-iyo dhexdhexaad ah. Waan soo dhawaynaynaa jawaab celinta shuruudahan u-qalmitaanka.

Shuruudahan u-qalmitaanka ayaa hagi doona go'aan qaadashada CLF; si kastaba ha ahaatee, CLF waxay xaq u leedahay inay gaarto go'aamo kiis-kiis ah, oo ay ku jiraan diidmada meelaynta kiisaska haddii loo baahdo.

## **2023 Tilmaamaha Faqriga Federaalka (Federal Poverty Guidelines)**

| <b>Tirada Qoyska</b> | <b>400% Heerka Saboolnimada Federaalka</b> |
|----------------------|--|
| <b>1</b>             | \$54,360                                   |
| <b>2</b>             | \$73,240                                   |
| <b>3</b>             | \$92,120                                   |
| <b>4</b>             | \$111,000                                  |
| <b>5</b>             | \$129,160                                  |
| <b>6</b>             | \$148,760                                  |
| <b>7</b>             | \$167,640                                  |
| <b>8</b>             | \$186,520                                  |

Si aad ugu qalanto Legal Food Hub, dakhliga qoyskaagu kama badnaan karo cadadka ku qoran kolomka gacanta middig, marka lagu daro tirada qoyskaaga qoyskaaga uu ka kooban yahay ee kolomka dhanka bidix.

\* Eeg boggan [2023 Tilmaamaha Faqriga Federaalka](#) wixii macluumaad dheeraad ah